



Heesti! Sakima



✎ Ursula Nafula

🔊 Peris Wachuka

📖 Abdi Muse

😊 Somali

📖 Level 3

(imageless edition)



Storybooks Canada

storybookscanada.ca


Heesti! Sakima

Written by: Ursula Nafula

Illustrated by: Peris Wachuka

Translated by: Abdi Muse


This story originates from the African Storybook (africanstorybook.org) and is brought to you by Storybooks Canada in an effort to provide children's stories in Canada's many languages.




This work is licensed under a Creative Commons

[Attribution 4.0 International License.](https://creativecommons.org/licenses/by/4.0)


<https://creativecommons.org/licenses/by/4.0>




Sakima wuxuu la noolaa waalidkiisa iyo walaashiisa afar jirta ah. Waxay ku noolaayeen dhulka ninka hodanka ah. Mundul kooda cawska ah waxuu ku yaalay meesha ugu dambaysa geedaha safan.




Ninkii taajirka ahaa waxuu aad ugu farxay in uu mar kale arko wiilkiisa. Waxuu abaalmaryey Sakima qalbiga uu dajiyay awgeed. Wuxuu isbitaalka u qaaday wiilkiisa iyo Sakima si Sakima na uu dib ugu helo aragiisa.




Marku Sakima ahaa saddex jir, ayuu xanuunsaday oo aragiiisii wayay. Sakima wuxuu ahaa wiil yar oo heybad leh.




Waqtigaa xaadirka ahaa, laba nin ayaa yimid iyaga oo qof ku wado naxash. Waxay soo heleen ninkii taajirka ahaa wiilkiiisa oo la garaacay loo gana tagay wadada dhinaceda.




Sakima waxuu sameeyay waxyaabo badan oo wiilasha da'doodu tahay lix sano jir aysan sameynin. Tusaale ahaan, wuxuu la fadhiisan karay dadka waa yeelka ah ee tuulada waxuuna kala xaajoon jiray arrimaha muhiimka ah.




Sakima wuu dhameysatay heestiisi uu heesayay waxa uu na u jeestay in uu tago. Laakiin ninkii taajirka ahaa ayaa banaanka si degdeg ah ugos baxay oo wuxuu ku yidhi, Fadlan markale hees.




Waalidiinta Sakima waxay ka shaqayn jireen guriga ninka hodanka ah. Waxay ka tagi jireen guriga aroortii, waxayna soo laaban jireen fiidkii. Sakima waxaa looga tagi jiray walaashiisa yar.




Shaqaalihii way joojiyeen wixii ay sameynayeen. Waxay dhagaysteen heesta Sakima ee quruxda badan. Laakiin hal nin ayaa yiri, "Qofna ma awoodin in uu dajiyo booska. Wiilkan indhoolaha aha ma waxuu u maleynayaa inuu dajin doono?"




Sakima wuxuu jeclaa in uu ku heeso heesaha. Maalin maalmaha ka mid ah, waxay hooyadiis weydiisay, “Halkee baad kaso barataa heesahan, Sakima?”




Waxa uu hoos istaagay daaqad weyn wuxuuna bilaabay in uu ku heeso heestiisi uu ugu jeclaa. Si tartiib ah, madaxa ninki hodanka ah ayaa bilaabay in uu kasoo muuqdo daaqadi weynayd.




Sakima wuxuu ku jawaabay, "Way iska
imaadaan, hooyo. Waxaan ka dhex maqlaa
mada xayga dabadoodna waan ku
heesaa."




Maalintii xigtay, Sakima wuxuu walaashisii
yarayd weydiistay in ay u wado ninkii
taajirka ahaa gurigiisa.




Sakima wuxuu jeclaa in uu u heeso walaashiisa yar, gaar ahaan, haddii ay dareento gaajo. Walaashiis waa ay dhageysan jirtay isaga oo heesayo heestiisa ugu macaan. Waxaa soo jiidan codka cod macaan leh.




Si kastaba ha ahaatee, Sakima ma niyad jabin. Walaashiisii yarayd ayaa ku taageertay isaga. Waxay tiri, "Sakima heestisa way idajisaa markaan gaajoonayo. Wayna dajin doontaa ninka taajirka ah."




“Ma heesi kartaa mar kale, Sakima,”
walaashiis ayaa ka baryi jirtay. Sakima waa
uu ka aqbalaa oo ku celceliyaa heesta
marar badan.



“Waan u heesi karaa isaga. Waxaa laga
yaabaa in uu markale farxo,” Sakima ayaa
waalkiisa u sheegay. Laakiin waalidiintisii
waa ay eryeen. “Waa nin aad taajir u ah,
waxaad tahay wiil indho la. Ma waxaad u
maleynysaa in ay heestaada caawin
doonto?”



Hal fiid markii ay waalidkiis guriga ku soo laabteen, ayay aad u aamusnaayeen. Sakima wuxuu ogaa in ay wax qaldan jiraan.



Maxaa qaldan hooyo, aabe? “Sakima ayaa waydiiyay. Sakima wuxuu ogaaday in wiilka ninkii hodanka ahaa uu maqan yahay, ninku wuxuu ahaa mid aad u murugooday oo cidloobay.